



Warka Adeegga Cuntada PPS: Cuntooyinka Qaadashada Fasaxa Gu'ga ee Maarso 19

Maarso 18, 2021

Qoysaska PPS ee Sharafta leh,

Waxaanu doonaynaa inaanu kuu sheegno warar iyo isbaddalada soo socda oo muhiim ah kuwaasi oo kusaabsan adeegayaga cuntada. Fasaxa gu'ga dartii, adeegga cuntadu wuxuu joogsan toddobaadka dambe (Maarso 22-26). Fadlan ku dadaal inaad timaad mid kamid ah [goobaha hadda cuntada aarku qaybino](#) Jimcaha, Maarso 19, inta u dhaxaysa 3:00 iyo 4:30 g.d. si aad u qaadato cunto toddoba maalmood u dhigantæi aad u isticmaasho xilliga fasaxa gu'ga.

Iyadoo waxbarashada isku-dhafka ah ay soo socoto, maalinta ugu dambaysa ee cuntada guryaha la gaynayo waxay noqon Jimcaha, Maarso 19. Waaxda Adeegyada Nafaqada PPS si aad ah ayey ugu mahadcelinaysaa iskaashiga ay ka heshay waaxda Gaadiidka Ardayga PPS sagaalkii bilood ee tagay si arrintan loogu suurto galiyo ardaydeena iyo qoysaskooda.

Adeegga cuntadu waxa uu dib uga bilaabmi goobo cusub iyo wakhtiyo cusub toddobaadka Maarso 29 tahay. Waxaanu dhawaan idin la wadaagi doonaa macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan goobaha iyo wakhtiyada adeegga ee cusub. Ama ilmahaagu ha noqdo mid ka qaybqaata qaabka waxbarashada isku-dhafka ama ha sii wato waxbarashada masaafadda, cuntooyinka dugsiyada waxay wali ahaan qaar u bilaash ah dhammaan ardayda dugsiyada oo dhigadood la eegin mutaysiga. Looma baahna aqoonsiga, magacyada ama macluumaad kale oo ardaydu leeyihiin si ay u helaan cuntooyinka.

Macluumaad faahfaahsan oo kusaabsan adeegayaga cuntada, fadlan booqo [websaytka Adeegyada Nafaqada PPS](#). Sidoo kale waxaad iimeyl u diri kartaa nutritionservices@pps.net ama wici kartaa 503-916-3399 wixii aad su'aalo qabto.

Waxaanu kuu rajaynaynaa fasax gu' oo badbaado iyo nasasho leh.